

PreK 4 ME Family Links

# CUTUBKA 4: MIDAFBYADA ADUUNKA

## ***Dulmarka Cutubka 4: Midabyada Aduunka***

Gudaha fasalka, waxaan bilaabi doonaa inaan barano midabyada aduunkeena ka jira. Waxaan wax ka baran doonaa shaqooyinka midabyada aduunka, iyo dabiicada. Ilmuhu waxay tijaabo ku samayn doonaan iskudarka midabyada, ayna ku jiraan samaynta midab madoow iyo buluug, anagoo raacinayna eray bixintooda. aageena bandhiyada, carruurtu waxay baran doonaan dhaqista iyo qalajinta dharka. Waxaan sii wadaynaa inaan xo-ojino xirfadaheena xisaabta oon ku samaynayno ciyaarta xisaabta ee wax tirinta, iyo dib u tirinta, iyo aadinta iyo nidamainta… iyo barashada moogaalaysiga iyo wadaagista iskumar.

## BUGAAGTA MURAAJACADA ee Cutubka 4




*Max's Dragon Shirt*

Waxaa qoray: Rose-mary Wells




*Dog's Colorful Day*

Waxaa qoray: Emma Dodd




*The Color of Us*

Waxaa qoray: Ka-ren Katz




*The Lion and the Little Red Bird*
Oo ay qortay Elisa Kleven

Sawiro lagasoo dajiyay amazon.com

**Ciwaanada kale ee bishaan waxaa ku jira…**

***Is It red? Is It Yelllow? Is It Blue?*** **Waxaa qortay Tana Hoban**

***Perfect Square*** ***waxaa Qoray Michael Hall***

***Sugaring*** ***by Jesse Haas***

***Backyard Birds*** ***Oo uu qoray Robert Bateman***

## Heesaha, Ciyaarta Erayga iyo Xarfaha

Carruurta fasalka dhigta waxay jecel yihiin dheesha laxanka wadata! La akhri qoraalkaan il-mahaaga oo waydiina inuu ku baro dheesha in-tuu heesaayo

### *ISTAAG*

Istaag, Jeeso.

Sacabka tun afar mar; ha fariisan.

Mark kale sacabi; Foorarso.

Kor u qad lugtaada; joogso hadda.

Rux gacantaada; Laab labada jilbood.

Gadaal u fariiso, kadibna isoo fiiri.



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

***Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka guriga***

# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

**Sayniska, Qaabka Waxbarashada, Farshaxanka Hal abuurka leh, Dhaqdhaqaaqa guud iyo Kan lafaha**

**<u>Socodka Midabka</u>**

Adoo adeegsanaaya bogga lifaaqa ku jira, u kaxee cunugaaga Socodka Midabka. Waxaad aadi kartaan banaanka, gudaha guriga, maktabada, dukaanka—meel kasta ood u socdaasho!

Usheeg cunugaaga inuu sawiro sawiro, ama uu muujiyo, bokisyo ay ku jirana waxyaabo oo uu arkaayo oo u eg midabka qalinka midabka oo ku jira bokis kasta.

Ka hadal midabyada, alaabaha, iyo waxy-

**Sayniska, Caafimaadka, Dhaqdhaqaaqa, Qaababka waxbarashada**

**<u>Cunista Qaanso Roobaad</u>**

Tani waa qaab aad midabka ugu darto xiliga cuntada Fudud! Adeegso alaabaha cuntada fudud ee gurigaaga, ama qorshee safar aad ku aadaan dukaanka cuntooyinka si aad u heshaan kuwo fudud. Dooro 3 ama 4 cunto oo midabyo kaladuwan leh una sheeg ilmahaaga inay kaa caawiso diyaarintooda. Barbarooniga midabka leh, tufaaxda, buskudka, jiiska—cuntooyin badan ayaa ku yimaada midabyo kaladuwan!

**Heerarka Xisabata, Dareenka Bulshanimo, Qaababka Waxbarashada iyo Cilmiga Bulshada**

**<u>Maalinta Dhar dhaqaalka</u>**

Waa maalinta dhar dhaqaalka! U sheeg cunugaaga inuu kaa caawiyo iskugu aadinta dharka midab ahaan. Waxaad ka codsan kartaa inuu iskugu aadiyo qaabab badan oo kaladuwan, ayna ku jiraan:

◊ Dharka cadcad iyo kuwa madoow

◊ Midabyada Madoowga, cadaanka iyo casaanka

◊ Sigisaan Isku aadinta

Ka hadal midabyada, hoosaska kaladuwan ee aad aragtaan, sida maryuhu yihiin.



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

## Kalmad ku socota waalidiinta iyo qoysaska: Joogtayntu waa Furaha

Ilmuhu hormar ayay ku gaaraan joogtaynta wax: jadwaladooda maalin kasta, anshaxooda, iyo xataa dookhyadooda cunta!

Hadba intaan joogtayso qumanaanta waxyaabaha iyo hawlaha caadiga ah, ayay farxada ilmahaagu sii kordhaysaa. Markay yaqaanaan waxa ay filanayaan, waxay ku nool yihiin dareenka nabada. Haddii isbadal ku dhaco jadwalkaaga, iskuday inaad ilmahaaga u sheego xili hore si ay ugu diyaar garoobaan.

Tani waxay si gaar ah u qusaysaa himilooyinka habdhaqanka iyo aadaabta. Ilmuhu waa inay ogaadaan si qaas ah waxa loo ogol yahay iyo waxa aan loo ogolayn inay sameeyaan. Waa inay sidoo kale yaqaanaan waxa dhici doona marka aysan raacin xeerarka.

Xog lagasoo qaaday http://www.the-preschool-professor.com/10-parenting-tips.html

Aaadista **Socodka**MIDABKA

Banaanka kusoo lugeeya oo soo daawada dhammaan waxyaabaha idiin dhaw.
Raadi
waxyaabaha yaala meeshaad ku soconayso si ay u matalaan sawir kasta. Samee
sawirka sheey kasta ood ka hesho
bokiska isku aadinta midabka.











